


FAAFINTA



RASMIGA

الرسمية

الجريدة

DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND EE SOOMAALIYA

لولاية ارض بونت الصومال

Sanadka 8-aad. Garowe 18. November. 2008

Lam. 11

Faafinta bil walba soo baxda

جريدة الشهرية

Qeypta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawlad Goboleedka Puntland

Qiimuhu waa Sh.So 10.000 walba rukunka sanadkii waa Sh.So 170.000 dalka gudihuisa dibada Sh.So 500.000 rukunka la waydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilowday 1-da Janaayo qiimaha qoritaanka F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3.000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaan xafiiska canshuuraha berriga ec Wassaaradda maaliyadda.

TUSMADA

Qeypta Koowaad

Sharci

Qeypta labaad

Xeer

Waxba ma leh

Qeypta Saddexaad

Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.

Waxba ma leh

Sharci Lr. 255. ee 18/11/2008, kuna suabsan lifaaqa 2-aad ee Dastuurkii danbe ee Puntland.

**DAWLAD GOBOLEEDKA
PUNTLAND EE SOOMAALIYA**



**PUNTLAND STATE
OF SOMALIA**

Xafiiska Madaxweynaha

Office of the President

Sharc Lr.255 ee 16/11/2008, kuna saabsan Lifaaqa 2-aad ee Dastuurka danbe ee Puntland.

Madaxweynuhu

- | | | |
|---------------------|---|--|
| Markuu arkay | : | Dastuurka DGPI qodobkiisa 54-aad faqradiisa 19-aad. |
| Markuu arkay | : | Dastuurka GPL ay ku dhaqanto eek u meel gaarka ah Golaha Wakiiladuna ansixiyeen 09/06/2001, kaasoo lagu dhaqmayo ilaa afti dadweyne lagu ansixiyo. |
| Markuu Arkay | : | Lifaaqa 2-aad ee Golaha Wakiilada GPL ansixiyeen 28/10/2008, kaasoo Golaha Wakiilada Puntland ku ansixiyeen in mudada xili howleedyada Golayaasha GPL yihiin 4-sano sida ku cad qodobada Dastuurka 43.3 iyo 54.16. |

Wuxuu soo saaray

Sharcigan soo socda:-

Qodobka 1-aad


Sharciga lifaaqa 2-aad ee Dastuurkan DGPI, waxaa ansixiyey Golaha Wakiilada Puntland 28/06/2008.

Qodobka 2-aad

Nuqlada asalka waxaa lagu kala kcydinaya Xafiiska Madaxweynaha, kan Garyaqanka guud iyo kan Xog-hayaha Golaha Wakiilada.

Qodobka 3-aad

Dhaqan galka sharcigani wuxuu noqonayaa maalinta Madaxweynuhu saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawlada, kadibna lifaaqan 2-aad wuxuu la qiime noqonayaa lifaaqa 1-aad ce isla dastuurkan Puntland ku dhaqanto oo ku meel gaarka ah.


Wabilaahi Towfiiq

**Mud. Maxamuud Muuse Xirsi
Madaxweynaha Dawlada Puntland**



Lifaaqa 2-aad ee Dastuurka GPL Mudada ku meel gaarka ah

Date:- 28/10/2008

Iyadoo laga amba-qaadayo lifaaqa koowaad ee Dastuurka GPL ee ku meel gaarka ah ee Golaha Wakiilladu ansixiyey 27/06/2001, ayaa Golaha Wakiillada GPL fadhiisi 27--28/10/2008 wuxuu ku ansixiyey lifaaqa 2-aad ee Dastuurka ku meel gaarka ah, kaasoo ka kooban Qodobadan hoos ku qoran:-

1. Dastuurkii ku meel gaarka ahaa ee hore loogu dhaqmayey ee ay ansixiyeen Golaha Wakiilladu 09/06/2001, ayaa jiraya inta laga hirgelinayo Dastuur afti dadweyne lagu ansixiyey.
2. Mudada xil haynta Golayaasha Dawladdu waa afar Sanadood sida ku cad qdobada Dastuurka 43.3 iyo 54.16.
3. Haddii Xukuumadda la dhisayo 2009 ay fulinwaydo labada Sanadood ee hore aftida Dastuurka & Nidaamka Xisbiyada waxaa kalsoonni loo weydiinayaa Golaha Wakiillada.
4. Golaha Wakiillada waxaa lagu soo xulayaa hab beeled waafaqsan sidii loogu soo xulay Golaha Wakiillada ee hadda jira, waxaana soo xulaya beelihi so xulay 30/12/2004 Golaha hadda wakhtigiisu dhamaadka yahay.

Wabillaahi Towfiiq

**Md:- Axmed Cali Xaashi
Guddoomiyaha Golaha Wakiillada GPL.**

